Xafiiska Maamulka Dhaqaalaha

# Qorshaha Talaabbada Istaraatiijiga ah ee **La Dagaalanka Isir Nacaybka iyo Taageerada Sinaanta (PEAR)** ee 2023-2024

## Tusmada


Tusaalaha Qorshaha Talaabbada Istaraatiijiga ah ee **La Dagaalanka Isir Nacaybka iyo Taageerada Sinaanta (PEAR)** ........ 1

**Macluumaadka Halka Lagala Xidhiidhayo** ........ 1

**Macluumaadka Kooxda PEAR** ........ 1

**Dhamaystirka Qiimaynta Aasaasiga ah ee Saamaynta Sinaanta (EIA)** ........ 1

**Liiska U diyaar Garoowga PEAR** ........ 2

**Maalgashiga Qorshaha Talaabada Istaraatiijiga ah ee PEAR** ........ 3

**Waaxda Shaqada Aasaasiga ah ee Wakaalada: Miisaaniyada** ........ 4

**Laynka Shaqada ee Muhiimka ah ee Wakaalada: Shaqaalaysiinta (Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ee Gobalka, Laanta Shaqaalaha ee OFM iyo laamaha gudaha ee OFM oo dhan)** ........ 9

**Waaxaha Muhiimka ah ee Shaqada Wakaalada: Heshiisyada** ........ 19

# Tusaalaha Qorshaha Talaabbada Istaraatiijiga ah ee **La Dagaalanka Isir Nacaybka iyo Taageerada Sinaanta (PEAR)**

Buuxi oo u gudbi dukumiintiga PEAR@equity.wa.gov ugu danbayn Sibteembar 1, 2022 (Amarka Fulinta 22-04 Qaybta 2f).

## Macluumaadka Halka Lagala Xidhiidhayo

Xafiiska Maamulka Dhaqaalaha
Lenora Sneva
lenora.sneva@ofm.wa.gov

## Macluumaadka Kooxda PEAR

**Wakaaladaada/Waaxda/Gudiga/Gudigu ma dhaqan gasheen Kooxdaada Buuxda ee Dagaalanka Isir Nacaybka iyo Taageerada Sinaanta (Pro-Equity Anti-Racist,PEAR) (Amarka Fulinta 22-04 Qaybta 2c)?**

Jawaabta: Haa

Sheeg magaca iyo ciwaanka iimeelka ee dhammaan xubnaha Kooxda PEAR: Arag galka lifaaqa ku jira

Hogaamiyaasha Fulinta ee Wakaalada: David Schumacher iyo Emily Beck

Sarkaalka Sinaanta ee Wakaalada: Lenora Sneva

Shaqaalaha: Arag liiska lifaaqa ku jira

Macaamiisha dibada: Arag liiska lifaaqa ku jira

Iskaashatada wakaalada: Arag liiska lifaaqa ku jira

Khubarada Qaybaha Muhiimka ah ee Ganacsiga: Arag liiska lifaaqa ku jira

## Dhamaystirka Qiimaynta Aasaasiga ah ee Saamaynta Sinaanta (EIA)

**Wakaalada/Waaxda/Golaha/Gudigu ma sameeyay Qiimaynta Aasaasiga ah ee Saamaynta Sinaanta (Equity Impact Assessment, EIA) ee qaybaha muhiimka ah ee ganacsiga wakaaladaada si loo go'aansho meelaha baahiyaha ugu wayn ka jiraan?**

Jawaabta: Haa

EIA yada Aasaasiga ah waa in la sameeyaa ugu danbayn Agoosto 1, 2022 (Amarka Fulinta Qaybta 2e).

# Liiska U diyaar Garoowga PEAR

**Tilmaamo:**

1. U adeegso Liiska Hubinta Diyaar Garoowga PEAR ee hoose si aad u sheegto talaabooyinka aad horey u qaaday si aad ugu diyaariso wakaaladaada abuurista iyo dhaqan gelinta Qorshaha Talaabada Istaraatiijiga ah ee PEAR iyo/ama
2. Aad u aqoonsato talaabooyinka wakaaladaadu u baahan tahay inay qaado si ay u kordhiso diyaar garoowga wakaaladaada ee abuurista iyo dhaqan gelinta qorshaha Istaraatiijiga ah ee Talaabada PEAR. Aqoonso taariikhda cayiman ee aad ku dhamaystirayso dhammaan Talaabooyinka Diyaar Garoowga PEAR.

Ogoow: Liiskaan hubinta ayaa qeexaaya talaabooyinka ugu yar ee hogaamiyaasha wakaaladu u baahan yihiin inay qaadaan si loo kordhiyo U diyaar Garoowga PEAR. Hogaamiyaasha wakaalada ayaa awooda ayna tahay inay qaadaan talaabooyin dheeri ah marka loo baahdo si ay ugu diyaariyaan wakaaladooda abuurista iyo dhaqan gelinta guulaysata ee Qorshaha Talaabada Istaraatiijiga ah ee PEAR.

**Wakaaladaada/Waaxda/Golaha/Gudigu ma dhameeyay dhammaan Talaabooyinka Diyaar Garoowga ee hoose?**

- Jawaabta: Haa
- Taariikhda wakaaladaadu dhamaystirtay dhammaan Talaabooyinka Diyaar Garoowga PEAR: 10/31/22

## Talaabooyinka Diyaar Garoowga PEAR:

☒ Hogaamiyaha wakaalada iyo dhammaan xubnaha kooxda Pear ayaa ka qaybgalaaya Kulanka Tababarka Kooxda PEAR ee tooska ah oo uu qabanaayo Xafiiska Sinaanta.

☒ Hogaamiyaha wakaalada iyo xubnaha Kooxda PEAR ayaa kulmaaya si u baxshaan Xiisada Tababarka Kooxda PEAR ayna uga hadlaan talaabooyinka kooban.

Abuur Bayaanka Kahorhotaga Isir Nacaybka iyo Taageerada Sinaanta (PEAR) oo uu saxiixaayo hogaamiyaha wakaalada taasoo sheegaysa muhiimada wakaaladu siinayso dhaqan gelinta Amarka Fulinta ee 22-04 iyo himilooyinka laga doonaayo shaqaalaha.

Ogoow: Waxaan ku talinaynaa in Bayaanka loo turjumo **ugu yaraan** 6 luuqadood ee ugu badan ee ay ku hadlaan dadka deegaanka ee wakaaladu u adeegto. Haddii aan la heli karin xogta, u turjun Bayaanka ugu yaraan 6 luuqadood ee ugu waawayn ee la aqoonsado adoo adeegsanaaya xogta ugu wanaagsan ee la heli karo ee Xafiiska Maamulka Dhaqaalaha (Office of Financial Management, OFM): Isbaanish, Fiyeednaamiis, Af-Ruush, Yukraniyaan, Tagalog, iyo Soomaali. Ku biri turjumaada luuqadaha kale haddii la codsado. Bayaanka PEAR iyo turjumaadaha waa in lasoo gashaa bogga hore ee wakaaladaada laguna dhex faafiyaa shaqaalaha iyo iskaashatada banaanka.

Abuur muuqaalka hogaanka wakaalada iyo kooxda PEAR oo xog ka faafinaaya Bayaanka PEAR ee wakaalada.

Ogoow: Turjumaada, qoraalka, iyo sharaxaada Luuqada Naafada Maraykanka (American Sign Language, ASL) waa in lagu baxshaa muuqaalka. Wakaaladu waa inay muuqaalka soo gelisaa boggeeda hore ayna la wadaagtaa shaqaalaha gudaha iyo iskaashatada banaanka.

Waxaan ku talinaynaa in Bayaanka lagu qoro **ugu yaraan** 6 luuqadood ee ugu badan ee ay ku hadlaan dadka deegaanka ee wakaaladu u adeegto. Haddii aan la heli karin xogta, u turjun qoraalka ugu yaraan 6 luuqadood ee ugu waawayn ee la aqoonsado adoo adeegsanaaya xogta ugu wanaagsan ee la heli karo ee Xafiiska Maamulka Dhaqaalaha (OFM): Isbaanish, Fiyeednaamiis, Af-Ruush, Yukraniyaan, Tagalog, iyo Soomaali. Ku biri turjumaada luuqadaha kale haddii la codsado.
Abuur xeerka iskii ah ee maamulka wakaalada kaasoo qeexaaya doorarka iyo waajibaadka dhaqan gelinta Amarka Fulinta ee 22-04.

## Maalgashiga Qorshaha Talaabada Istaraatiijiga ah ee PEAR

Ayadoo lagu saleynaayo EIA ga Aasaasiga ah, qeex sadex (3) Maal gashiyada Qorshaha Talaabada Istaraatiijiga ah ee PEAR ee wakaaladaadu doonayso inay samayso sanadka soo socda.

# Qorshaha Talaabbada Istaraatiijiga ah ee **La Dagaalanka Isir Nacaybka iyo Taageerada Sinaanta (PEAR) ee xafiiska** OFM 2023-2024

## Waaxda Shaqada Aasaasiga ah ee Wakaalada: Miisaaniyada

### Laynka Adeegga PEAR ee baahiyuhu ugu badan yihiin: **Farsamooyinka Dejinta Miisaaniyada Gobalka oo Dhan**

Muhiimada Laynka Adeegga ee PEAR ee baahiyaha ugu badan ka jiraan:

- U adeegso tilmaamaha miisaaiyada ee haga wakaaladaha si aad ugu darto dedaallada wacyi gelinta iyo xogta shaqsiyaadka barnaamijyada/adeegyadu hadda gaaraan iyo cida aysan gaarin.
- Uruuri xogta dadka kaladuwan, saamaynada dhaqaalaha, iyo gaarista barnaamijka/adeegga (tan ayaa naga caawinaysa inaan ogaano haddii bulshooyinku heli karaan barnaamijyada/adeegyada)
- Cadeynta helitaanka
- Xog dheeri ah ka bixi tilmaamaha shuruudaha xogta oo la siinaayo wakaaladaha si kor loogu qaado sharafteena xogta iyo gaarista bulshada.

**Qeexitaanka Maalgashiga Laynka Adeegga PEAR - Soo koob xeerarka, hanaannada, farsamooyinka, iyo habraaca quseeya maalgashigaan:**

- Tilmaamaha Miisaaniyada ee aan u dirno wakaaladaha.
- Dukumiintiga baakada go'aanka ee ay tahay in wakaaladuhu soo gudbiyaan si ay u helaan dookhyada maalgelinta.
- Kulannada miisaaniyada ee OFM qabato si ay u taageerto wakaaladaha ayadoo adeegsanaysa hanaanka miisaaniyada.

**Waa maxay sinaan la'aanta aad doonayso inaad u adeegsato maalgashiga si aad u yareyso ama u baabi'iso?**

Xaqiiji in talooyinka miisaaniyada ee loo diro gudoomiyaha gobalka iyo baarlamaanku ay yihiin kuwo cadaalad ah oo ay ku jirto xog faahfaahsan.

**Kooxahee dadka iyo/ama goobaha, ay baahida ugu wayn ka jirto, ayaa u baahan in diirada lagu saaro maal gelintaan?**

Arintaan ayaa diirada saaraysa qof kasta oo hela gunnooyinka iyo adeegyada gobalka. Heerka gunnooyinka iyo adeegyada waxaa kamid ah:

- Caawimaada Kaashka ah ee dadka deegaanka ee danyarta ah
- Caawimaada cuntada
- Gunnooyinka shaqo la'aanta
- Adeegyada shaqo la'aanta
- Hooyga iyo guryaha rasmiga ah
- Caawimaad ku aadan helitaanka iyo haysashada hooy iyo guri
- Barnaamiyada hormarinta dhaqaalaha ee ganacsiyada iyo bulshooyinka
- Kaabeyaasha aasaasiga ah (tusaale, biyaha la cabo, biyaha daadka, biyaha bulaacada, wadooyinka, kanaallada, iyo interneedka)
- Daryeelka caafimaadka jirka iyo habdhaqanka
- Xabsiyada
- Sharci fulinta
- Dhammaan heerarka waxbarashada

**Wakaaladaadu ma la tashataa dawladaha qabiillada iyo Ururada Hindida Maraykanka ee la Aqoonsan yahay (RAIO)? Sidee ayuu maalgashigaan u dabaqayaa talooyinka ay baxsheen?**

Lama aanaan tashan dawladaha qabiillada iyo Ururada Hindida Maraykanka ee la Aqoonsan yahay (American Indian Organizations, RAIO) wali. Hase yeeshee, waxaan muhiimada saari doonaa inaan la tashano dhawaan.

**Maxay bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu gaartay u aqoonsadeen inay tahay sababta ka danbaysa cadaalad darada? Sidee ayay maal gelintaadu u xalinaysaa dhibaatooyinkaan sababta keenay?**

Sababaha aasaasiga ah waa:

- Dadka oo aan helin gunnooyinka saxda ah sabab la xiriirta in aysan helin isku xir.
- Dhaqan gelinta iyo qoondeynta adeegga saxda ah ee qofka ama kooxda.

Waxaan xal u raadin doonaa sababaha keenaaya ciladaha anagoo kala shaqeynayna wakaaladaha go'aaminta noocyada barnaamijyada la shaqeeya wakaaladaha saamayntu ku dhacday aana uruurino xog ku aadan sida wada shaqeyntaan ku socoto.

### Sidee ayay maal gelintaadu u xalinaysaa walaacyada iyo muhiimadaha ay tilmaameen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseeya ee ay saamayntu ku dhacayso?

Waxaan u baahan nahay inaan kor u qaadno mugga xogta aan siino go'aan gaareyaasha si aan u xaqiijino in maaliyada gobalku ay gaarto dadka loogu talo galay.

### Sidee ayay maal gelintu u kordhin kartaa ama u yareyn kartaa faa'iidooyinka bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseynaaya? Kordhinaysa ama yareynaysa culaysyada? Sidee ayay wakaaladaadu ku aqoonsanaysaa ayna ku yareynaysaa waxyeelooyin kasta oo aan loo qasdin?

Waxaan aqoonsan doonaa meesha maalgashiyada istaraatiijiga ah lagu bixinaayo iyo natiijooyinka daraasaadka mustaqbalka.

### Go'aamiyaasha PEAR ee Sinaanta ee lagu taageeraayo maalgelintaan.

Maal gelintaan ayaa taageeri doonta dadka hela ama aanan helin adeegyada. Xogta shaqsiga hela ama aanan helin adeegyada ama gunnooyinka maal gelinta gobalka, tusaale, caawimaada kaashka, kaalmada cuntada, daryeelka cuntada, kaabeyaasha (wadooyinka, kaabeyaasha biyaha, fiilooyinka interneedka), xogta juquraafiyada, wakhtiga, dhaqan gelinta barnaamijka iyo wacyi gelinta (sida barnaamijyada loo gudbiyo, inkastoo, tani ku jiri karto qaybta xogta, cadadka Lacagta).

### Go'aamiyaasha PEAR ee Kooxaha Sinaanta [Nidaamyada Taageerada Bulshada (Waaxda), Nidaamyada Taageerada Qoyska (Laamaha), Kaabeyaasha Bulshada (Nidaamka Aasaasiga ah), Shaqooyinka Dawlada (Ciida iyo Macdanta)] ee lagu taageeraayo maalgelintaan.

Haddii si wax ku ool ah loo sameeyo, hawshaan ayaa saamaynaysa dhammaan kooxaha.

### Natiijooyinka PEAR ee la Doonaayo:

Guusheena ayaa u eeg farsamooyinka miisaaniyada adeegso xogta, fikradaha macaamiisha iyo saamileyda si aad noogu sheegto dhinacyada u baahan in hoosta laga xariiqo ama diirada loo saaro. Guusha ayaa sidoo kale u eeg in aan si siman ugu qaybinay barnaamijyada iyo adeegyada.

### Habdhaqannada PEAR ee loo baahan yahay si loo gaaro Natijooyinka PEAR ee loo la doonaayo:

- Xog uruurinta awooda badan

- Falcelinta wanaagsan ee macmiilka iyo talooyinka saamileyda
- Hormarinta joogtada ah / qaybaha falcelinnada

**Hogaanka ama Kooxda Maalgashiga Laynka Adeegga PEAR - Cida masuulka ka ah hogaaminta talaabooyinka?**

- Waaxda Miisaaniyada OFM
- Waaxda Odorasta

**Baahiyaha wada shaqeynta - Yay u baahan tahay wakaaladu inay la shaqayso si ay maal gelin u samayso?**

- Waa inaan samaynaa cilmi baaris tayo eegis ah iyo kooxaha diirada oo loo qabanaayo bulshooyinka saamayntu ku dhacday. Tan ayaa naga caawinaysa inaan si fiican u fahanno aana waydiino su'aalo si aan u uruurino cilmi baarista ugu haboon.
- Kala shaqee wakaaladaha go'aaminta noocyada barnaamijyada la shaqeeya wakaaladaha saamayntu ku dhacday iyo sida wada shaqeyntaan ku socoto.

**Waa maxay caqabadaha, culaysyada, iyo/ama khataraha ka imaan kara maalgashigaan?**

Jadwalka hadda ee miisaanyada ayaa caqabad ku noqon kara wakaaladeena si ay u dhamaystirto maal gelintaan. Caqabad kale oo hadda taagan waa inaan u baahan nahay inaan ka shaqeyno sida wakaaladuhu u wada shaqayn doonaan si ay u wadaagaan dedaallada saamileyda, xogta, iyo macluumaadka.

**Xalalka la aqoonsaday si loo xaliyo baahiyaha khayraadka iyo caqabadaha/culaysyada/khataraha:**

Yoolku waa in la abuuro xalal ku dhisan ilaha jira ee maal gelinta.

**Taariikhda Biloowga Maal gelinta Laynka Adeegga PEAR:**

Juun 2023

**Taariikhda Dhammaadka Maal gelinta Laynka Adeegga PEAR:**

Diisambar 2024

**Cabirada Waxqabadka PEAR - Waa maxay cabirada loo adeegsan doono go'aaminta waxtarka maalgashiyada? Cabiradaan fikir ma ku darsadeen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu gaartay?** Dooro ugu yaraan cabirka 1 natiijo iyo cabirka 1 hawleed maalgashi kasta.

- Cabirka natiijada lambar 1: Wada shaqaynta bulshada oo wayn iyo talooyinka saamileeyda.

- Cabirka hawsha lambar 1: Kordhinta tirada ururada aan kala tashano inta lagu jiro shaqada dhisida miisaaniyada.

Yoolalka PEAR - waa maxay waxa rasmiga ah ee wakaaladaadu ku guul gaarayso 3 bilood ee ugu horaysa (Rubuca 1) kadib taariikhda biloowga maalgelintaan? Yoolalkaan fikir ma ku darsadeen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu gaartay? Dooro 1 yool calaa natiijo kasta iyo cabirka hawsha.

- Cabirka natiijada Lambar 1: Yoolka Rubuca 1: Abuur aasaaska si loo fahmo cadadka wakaaladaha saamileyda dadka kaladuwan kasoo jeeda ee adeegga gaarsiinayaan.
- Cabirka Hawsha Lambar 1:Yoolka Rubuca 1: Uruurinta xogta wakaaladaha ee ku aadan xiriirada saamileyda/fikradaha barnaamijku dhiibtay.

**Waa maxay ilaha xogta ee wakaaladaadu u adeegsan doonto cabirida guusha?** Tixgeli ilaha xogta ee ay abuureen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseeya ee ay saamayntu gaartay marka la heli karo.

- Xogta shaqsiga hela ama aanan helin adeegyada ama gunnooyinka maal gelinta gobalka, tusaale, caawimaada kaashka, kaalmada cuntada, daryeelka cuntada, kaabeyaasha (wadooyinka, kaabeyaasha biyaha, xadhkaha interneedka), / xogta juquraafiyada / wakhtiga / dhaqan gelinta barnaamijka iyo wacyi gelinta (sida barnaamijyada loo gudbiyo, inkastoo, tani ku jiri karto qaybta xogta / cadadka Lacagta.
- Sida haboon, barnaamijkaan/xalkaan ayaa saamaynaaya dhammaan dadka reer Washington ee dhammaan aagaga gobalku maalgasho.

**Qeex qorshaha aad kula shaqaynayso, kula wadaagayso, ku dhagaysanayso, isbadel ku samaynayso, aadna wax uga baranayso bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu ku dhacayso inta lagu jiro dhaqan gelinta maalgashiga:**

Gudaha, OFM ayaa adeegsan doona shirka miisaaniyada si uu xog u siiyo ulana shaqeeyo iskaashatada wakaaladaha gobalka ee shaqadu qusayso. OFM ayaa eegi doono aagaga muhiimka ah ee wada shaqaynta lala yeesho macaamiisha banaanka, inkastoo hawshaan ay badanaa qusayn karto iskaashatada wakaalada.

**Qeex qorshaha aad kula shaqaynayso, kula wadaagayso, ku dhagaysanayso, isbadel ku samaynayso, aadna wax uga baranayso bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu ku dhacayso inta lagu jiro qiimaynta maalgashiga:**

Gudaha, OFM ayaa adeegsan doona shirka miisaaniyada si uu xog u siiyo iskaashatada wakaaladaha gobalka ee shaqadu qusayso. OFM ayaa eegi doono aagaga muhiimka ah ee wada shaqaynta lala yeesho macaamiisha banaanka, inkastoo hawshaan ay badanaa qusayn karto iskaashatada wakaalada.

## Laynka Shaqada ee Muhiimka ah ee Wakaalada: Shaqaalaysiinta (Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ee Gobalka, Laanta Shaqaalaha ee OFM iyo laamaha gudaha ee OFM oo dhan)

### Laynka Adeegga PEAR ee baahiyuhu ugu badan yihiin: **Farsamooyinka shaqaale qorista gobalka**

#### Muhiimada Laynka Adeegga ee PEAR ee baahiyaha ugu badan ka jiraan:

- Waxaan hadda leenahay nooca baahsan ee raadinta adeeg bixiyaasha kaladuwan. Waxaa jirta fursad lagu abuuraayo farsamooyin joogto ah oo casri ah, khayraad, iyo farsamooyinka ugu wanaagsan si aan saamayn ugu yeelano duleellada nidaamka ee ka jira helitaanka, sinaanta iyo fursada.
- HR ka OFM ayaa horay uga shaqeynaayay hawshaan oo qayb ka ah dedaalladiisa PEAR. Kooxdaan ayaa noqon karta unug/naadi.

#### Qeexitaanka Maalgashiga Laynka Adeegga PEAR - Soo koob xeerarka, hanaannada, farsamooyinka, iyo habraaca quseeya maalgashigaan:

HR ka gobalka (farsamooyinka shaqaalaysiinta ee gobalka oo dhan)

- Barnaamijka NEOGOV
- Wuxuu hogaanshaa aqoon kororsiga gobalka oo dhan oo ku aadan shaqaale qorista iyo haynta shaqaalaha.
- Wuxuu abuuray shaqo caadi ka dhigaysa shaqooyinka shaqaalaysiinta ee wakaalada oo dhan (tusaale, NEOGOV).
- Wuxuu taageeraa mashruucyada wakaaladaha gobalka ee loo cuskado shaqadeena. Tusaale, Waaxda Xafiiska Ganacsiga ee Dhalinta Bilaa Hooyga ah ayaa dhisaaya kartida khibrada nolosha oo lagu dabaqaayo bandhigyadooda shaqada. Waxaan adeegsan karnaa xogta ay soo helaan waxaana ku dabiqi karnaa shaqadeena, marka loo baahdo.
- Leadership Tomorrow (urur hogaamineed) ayaa sameeyay cilmi baaris asagoo kaashanaaya Waaxda Amaanka Shaqada, Waaxda Ganacsiga, Waaxda Arimaha Ciidanka Hawlgabay, iyo Ilaallada Gobalka Washington si loo fahmo nooca hawsha shaqaalaysiinta noqonayso waxayna bixiyeen talooyin ku aadan sida loo dhisi karo sinaan lagu dabaqo hawlahooda shaqaale qorista.

- Waxaan ku dhaqanaa xeerkaan gobalka: [Yaa masuul ka ah go'aaminta qaababka shaqaale qorista ee ku haboon si loo daboolo baahiyaha shaqaale qorista ee shirkada?](#) (WAC 357-16-020)

OFM HR

- Qiimee farsamooyinka iyo tababarka dhammaan heerarka hawsha shaqaale qorista. Tan waxaa ku jiri kara:
    - Xeerarka gudaha ee shaqaale qorista
    - NEOGOV
    - Liiska hubinta shaqaale qorista
    - Bogga xogta shaqaale qorista ee kormeereyaasha shaqaalaysiinta
    - Tusaaleyaasha su'aalaha wareysiga, hubinnada tixraaca
    - Tababarka Eexda Muuqata ee kooxda shaqaale qorista
- Waxaan ku dhaqanaa xeerkaan gobalka: [Yaa masuul ka ah go'aaminta qaababka shaqaale qorista ee ku haboon si loo daboolo baahiyaha shaqaale qorista ee shirkada?](#) (WAC 357-16-020)

## Waa maxay sinaan la'aanta aad doonayso inaad u adeegsato maalgashiga si aad u yareyso ama u baabi'iso?

HR ka Gobalka iyo HR ka OFM

- Waxaan doonaynaa inaan yareyno duleellada nidaamka ee dhinacyada helitaanka, sinaanta, iyo fursada dadka doonaaya shaqada. Bulshooyinka gaarka ah ee taariikhiyan la faquuqi jiray ee aan ognahay inay waajahayaan caqabadahaan oo ka haysta gobalka waxaa kamid ah:
    - Milatariga (Ciidanka hore, xaasaska, qoyska)
    - Aqoonta Ingiriisiga oo yar (Limited English proficient, LEP)
    - Naafada
    - LGBTQIA2S+
    - BIPOC
    - 40+
    - Haweenka
    - Soogalootiga
    - Shaqsiyaadka horay xabsiga u soo maray
    - Ameerikaanka dhaladka ah/dawladaha qabiillada

Tan ayaa saamaysay dadka aan u adeegno waayo waxaa jira xiriir toos ah oo kala dhexeeya khibradaha iyo dhaqanka shaqaalaheena iyo adeegyadeena aan siino dadka reer Washington.

HR ka Gobalka

- Waxaan doonaynaa inaan xal u helno wakaaladaha gobalka ee aan lahayn hanaanka midaysan ee shaqaale qorista iyo shaqaalaysiinta, iyo arimaha ka dhasha taas.

## Kooxahee dadka iyo/ama goobaha, ay baahida ugu wayn ka jirto, ayaa u baahan in diirada lagu saaro maal gelintaan?

HR ka Gobalka

- Hadda, ma hayno xog aan uga jawaabno su'aashaan. Diirada heer gobal waa inaan helno xog rasmi ah oo ka xaqiijinayso in wakaaladaha gobalku ay yaqaanaan kooxaha dadka iyo/ama goobaha baahiyaha ugu badan ka jirana.

HR ka OFM

- Bulshooyinka aan helin matalaada ku filan ee aan heli karin xogta la xiriirta shaqaale qorista/shaqooyinka lasoo xayeysiiyo iyo fursadaha shaqada.
- Shaqsiyaadka qaba carqaladaha helitaanka - helitaanka interneedka ama kumbuyuutarka, luuqada / baahiyaha turjumaada
- Qeexitaannada shaqada ee la socda shuruudaha waxbarashada.

## Wakaaladaadu ma la tashataa dawladaha qabiillada iyo Ururada Hindida Maraykanka ee la Aqoonsan yahay (RAIO)? Sidee ayuu maalgashigaan u dabaqayaa talooyinka ay baxsheen?

Wakaaladaadu ma la tashataa dawladaha qabiillada iyo Ururada Hindida Maraykanka ee la Aqoonsan yahay (RAIO) wali. Hase yeeshee, waxaan wadnaa qorshe aan sidaas ku samaynayno dhawaan.

## Maxay bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu gaartay u aqoonsadeen inay tahay sababta ka danbaysa cadaalad darada? Sidee ayay maal gelintaadu u xalinaysaa dhibaatooyinka sababta keenay?

HR ka Gobalka

Sida aan kor ku sheegnayba, ma hayno xog ka jawaabi karta su'aashaan. Diirada heer gobal waa inaan helno xog rasmi ah si loo xaqiijiyo in wakaaladaha gobalku ay bartaan ayna fahmaan waxyaabaha keenaaya sinaan la'aanta.

HR ka OFM

Waxaan aqoonsanay sababaha keenay sinaan la'aanta:

- Kala duwanaanta shaqo doonka iyo shaqaalaha
- Inaan la heli karin hawsha codsiga
- Xogta kooban
- Ciladaha tignooloojiyada
- Shuruudaha shaqada (sida u baahashada digrii)
- Farsamooyinka eexda ku dhisan ee shaqaale qorista

Waxaan xalin doonaa arimahaan anagoo samaynayna xog uruurin, farsamooyinka ugu haboon ee shaqada, tababarka, xeerka, iyo xogaha cusub ee habraaca.

## Sidee ayay maal gelintaadu u xalinaysaa walaacyada iyo muhiimadaha ay tilmaameen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseeya ee ay saamayntu ku dhacayso?

HR ka Gobalka

Wali ma aanaan fahmin walaacyada iyo muhiimadaha bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu ku dhacayso gobalka oo dhan.

HR ka OFM

- Ilaa iyo hadda, waxaan fikrado ka uruurinay macaamiisha anagoo adeegsanay xog uruurin iyo kooxda diirada. Waxaan u taagan nahay inaan helno fikradaha dheeriga ah ee macaamiisha.
- Waxaan xalin doonaa walaacyada anagoo adeegsanayna xogta si aan u fahanno bulshooyinka aan helin matalaada saxda ah. Waxaan xog ku uruurin doonaa kooxaha diirada, xog uruurinnada, iyo dib u eegisyada helitaanka. Waxaan sidoo kale dib u eegis ku samaynaa xogta shaqaalaysiinta.
- Waxaan xalin doonaa muhiimadaha anagoo go'aaminayna waxa aan ka guul gaari karno, anagoo haddana tixgelinayna jadwalka iyo ciriiriga miisaaniyadeed.

### Sidee ayay maal gelintu u kordhin kartaa ama u yareyn kartaa faa'iidooyinka bulshooyinka/ shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseynaaya? Kordhinaysa ama yareynaysa culaysyada? Sidee ayay wakaaladaadu ku aqoonsanaysaa ayna ku yareynaysaa waxyeelooyin kasta oo aan loo qasdin?

HR ka Gobalka iyo HR ka OFM

- Waxaan yareyn karnaa aana isku dayi karnaa inaan meesha ka saarno caqabadaha shaqaalaha gobalka uga yimaada hawsha shaqaale qorista marka aan fahanno caqabadaha jira. Kuwaan waxaa ku jira helitaan la'aanta, hawsha oo dabo dheer, iyo/ama inay adag tahay in shaqaalaha gobalka xirfadahooda la aqoonsado.
- Waxaan u taagan nahay inaan xaqiijino inaan fikrado nagu filan ka uruurino tiro dad ah oo ku haboon kahor inta aanaan qaadin talaabo si aan u xaqiijino in khibrada hal qof aysan badelin hawsha oo dhan.

### Go'aamiyaasha PEAR ee Sinaanta ee lagu taageeraayo maalgelintaan.

Sinaanta hawlaha gobalka iyo kuwa maxaliga ah, sinaanta shaqooyinka iyo tababarka shaqada iyo cadaalada dhaqaalaha

### Go'aamiyaasha PEAR ee Kooxaha Sinaanta [Nidaamyada Taageerada Bulshada (Waaxda), Nidaamyada Taageerada Qoyska (Laamaha), Kaabeyaasha Bulshada (Nidaamka Aasaasiga ah), Shaqooyinka Dawlada (Ciida iyo Macdanta)] ee lagu taageeraayo maalgelintaan.

Kaabeyaasha Bulshada (Nidaamka Aasaasiga ah) iyo Farsamooyinka Dawlada (Ciida iyo Nafaqada)

### Natiijooyinka PEAR ee la Doonaayo:

- HR ka Gobalka – Fahanka iyo xal u helida su'aalaha ku xeeran shaqaale qorista iyo shaqaaleysiinta gobalka oo dhan. Kor u qaadista kala duwanaanta shaqaalaysiinta iyo abuurista hanaan loo maro dhammaan hawlaha shaqaalaysiinta gobalka oo dhan.
- OFM HR – Fahanka iyo in meesha laga saaro caqabadaha codsiga OFM, wareysiga, iyo hawlaha yabooha shaqada. Ku dhisida sinaan dheeri ah hawsha shaqaale qorista.

### Habdhaqannada PEAR ee loo baahan yahay si loo gaaro Natijooyinka PEAR ee loo la doonaayo:

- Kordhinta codka – Tiir dhexaad uga dhigida codadka shaqaalaha gobalka marka la dejinaayo xeerka, barnaamijka, habraaca, iyo nashqada farsamada iyo gaarista go'aanka.

- Shaqaale La Tixraaci karo – Xaqiijinta in aan lahaano matalaada dhaqanka, luuqada, iyo isirka/qoomiyada shaqaalaheena kuwaasoo cuskan kara khibradahooda nolosha ee bulshooyinkeena kordhinna kara awooda gobalka ee daboolida baahiyaha iyo muhiimadaha bulshadeena.
- Khibrada shaqaalaha – Abuurista jawi u sahlaaya shaqaalaha inay yimaadaan shaqada ayagoo ah shaqsiyadooda dhabta ah ayagoo dareemaaya soo dhawayn, amaan, iyo qadarin, iyo xaqiijinta inay qabtaan shaqadooda buuxda.
- Dhisida kartida shaqaalaha – Siinta waxbarasho iyo hormarin ku dhisan shaqaalaheena si ay u awoodaan inay dhisaan awoodahooda hormarinta sinaanta, cadaalada isirka, helitaanka, iyo kamid ahaanshaha.
- Hormarinta joogtada ah ee shaqaalaha – Waxaan ka shaqeyn doonaa qaadashada iyo hormarinta shaqaalaha astaanta u ah sinaanta, cadaalada isirka, helitaanka, iyo kamid ahaanshaha, *oo* leh damaca iyo awooda hormar samaynta. Waxaan sidoo kale hormarin doonaa mabaadii'daan oo lagu dabaqaayo shaqaalaha hadda shaqeeya.
- Codka shaqaalaha – Ka loo shaqeeye ahaan, waxaan u taagan nahay kor u qaadista codadka shaqaalaha oo lagu daraayo xeeladaheena hormarinta sinaanta, cadaalada isirka, helitaanka, iyo kamid ahaanshaha gobalkeena.
- Taageerada Kooxda Khayraadka Ganacsiga (Business Resource Group, BRG) – Dawladeena ayaa la shaqaynaysa kooxaha ganacsiga iyo shaqaalaha si ay u fahanto loona xaliyo arimaha sinaanta, cadaalada isirka, helitaanka, iyo kamid ahaanshaha ee muhiimka u ah. Waxaan maal gelin doonaa Kooxaha Khayraadka Bulshada (BRG) si aan kor ugu qaadno awoodooda:
    - sii wadista u doodista shaqaalaha,
    - kordhinta muuqashadooda,
    - uga caawino waakaladaheena shaqaalaysiinta iyo sii haynta shaqaalaha,
    - siinta tababar wakaaladaha gobalka, iyo
    - talooyin siinta xeeladaha iyo xeerarka gobalka ee goob shaqo oo badqab leh, la geli karo, oo ku haboon dhaqanka.
- Iskaashiyada Joogtada ah – Abuurista iskaashiyo lala sameeyo saamileyda si loo dhiso kalsoonida.

## Hogaanka ama Kooxda Maalgashiga Laynka Adeegga PEAR - Yaa masuul ka ah hogaaminta talaabooyinka?

HR ka Gobalka iyo HR ka OFM ayaa hogaaminaaya hawshaan. Isla maalgeliyaasha adeeggaan PEAR waa Michaela Doelman, Madaxa Shaqaalaha ee HR ta Gobalka iyo Leticia Gomez-Esposito, agaasimaha OFM HR.

## Baahiyaha wada shaqeynta - Yay u baahan tahay wakaaladu inay la shaqayso si ay maal gelin u samayso?

Waxaan kala shaqayn doonaa hogaamiyaasha wakaaladaha gobalka, xirfadleyaasha HR ta gobalka, iyo maamuleyaasha shaqaale qorista ee wakaalada Gobalka, shaqaalaha gobalka, Xafiiska Gudoomiyaha Gobalka, Xafiiska Sinaanta, kooxaha bulshada, iyo ururada khayriga ah.

## Waa maxay caqabadaha, culaysyada, iyo/ama khataraha ka imaan kara maalgashigaan?

Caqabadaha iyo culeysyada haysta HR ka gobalka waxaa kamid ah:

- Shaqaalaha oo ku yar
- Fikrado aan isbadel lahayn oo ku aadan sida shaqo doon xirfad leh u yaalo
- Cabirida hawsha dhammaan OFM
- Ku xirista dadka saxda ah ee shaqada saxda ah
- Xaqiijinta in goobaha shaqadu ay diyaar u yihiin kala duwanaanta shaqaalaha.

Caqabadaha iyo culeysyada haysta HR ka OFM waxaa kamid ah:

- Shaqaalaha oo ku yar
- Fikrado aan isbadel lahayn oo ku aadan sida shaqo doon xirfad leh u yaalo oo ka jira OFM
- Ku xirista dadka saxda ah shaqada saxda ah iyo xaqiijinta in kooxaha OFM ay diyaar u yihiin sinaanta goobta shaqada.

## Xalalka la aqoonsaday si loo xaliyo baahiyaha khayraadka iyo caqabadaha/culaysyada/khataraha:

Waxaan hadda wadnaa aqoonsiga xalalka caqabadahaan.

## Taariikhda Biloowga Maal gelinta Laynka Adeegga PEAR

Juun 2023

## Taariikhda Dhammaadka Maal gelinta Laynka Adeegga PEAR

Sibteembar 2024

**Cabirada Waxqabadka PEAR - Waa maxay cabirada loo adeegsan doono go'aaminta waxtarka maalgashiyada? Cabiradaan fikir ma ku darsadeen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu gaartay?** Dooro ugu yaraan cabirka 1 natiijo iyo cabirka 1 hawleed maalgashi kasta.

Waxaan ku saleynay cabiradaan fikradaha hore ee aan ka helay bulshooyinka/ shaqaalaha/dhinacyada xiiseeya ee ay saamayntu ku dhacday. Waxaan doonaynaa inaan fikir dheeri ah helno waxaana cusbooneysiin doonaa natiijooyinkeena iyo cabirada hawsha, marka loo baahdo.

- Cabirka natiijada HR ka Gobalka - 80% kamid ah wakaaladaha gobalka ayaa gasha xogta rasmiga ah nidaamka NEOGOV.
- Cabirada Hawsha HR ka Gobalka:
  - Cabirka #1: Wuxuu bilaabaa hawsha abuurista si wadajir ah tilmaan ama EO ga isticmaalka loogu talo galay OLRS (Nidaamka Shaqaale Qorista Oonlaynka ah) . 12/31/2024
  - Cabirka #2: Wuxuu kala shaqeeyaa saamileyda inay aqoonsadaan talaabooyinka hawsha heerka OLRS ee loo baahan yahay si xogta DEI oo la isku halayn karo loo helo loona siiyo tilmaanta wakaaladaha. 12/31/2024
  - Cabirka #3: Wuxuu kala shaqeeyaa saamileyda go'aaminta luuqada guud ee NEOGOV iyo siinta qeexitaannada wakaaladaha. 12/31/2024
  - Cabirka #4: Wuxuu dhisaa lana shaqeeyaa Golaha Maamulka Xirfadaha bil kasta. *Hawsha TBD ee taagan ee cabirada hore.*
  - Cabirka #5: Wuxuu siiyaa tababarka hawsha NEOGOV shaqaale qoreyaasha gobalka. *Hawsha TBD ee taagan ee cabirada hore.*
  - Cabirka #6: Wuxuu abuuraa isla xisaabtanka iyo farsamooyinka cabirka. *Hawsha TBD ee taagan ee cabirada hore.*
- Cabirka halaha HR ee OFM – OFM HR ayaa siinaysa xogta shaqaale qorista, gaarka u ah waaxda waaxaha OFM ugu danbayn Sibteembar 2024.
- Cabirka hawsha OFM HR – Qeexaa heerka qaybaha xogta iyo qeexitaannada (tusaale, wakhtiga ugu haboon shaqaale qorista) ee kormeereyaashu u baahan yihiin si ay u gashaan nidaamka (NEOGOV ugu danbayn Juun 2024).

**Yoolalka PEAR - waa maxay waxa rasmiga ah ee wakaaladaadu ku guul gaarayso 3 bilood ee ugu horaysa kadib taariikhda biloowga maalgelintaan? Yoolalkaan fikir ma ku darsadeen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu gaartay?** Dooro 1 yool calaa natiijo kasta iyo cabirka hawsha.

Waxaan adeegsanay fikradaha hore ee aan ka helay bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada xiiseeya ee ay saamayntu ku dhacday. Waxaan doonaynaa inaan fikir dheeri ah helno waxaana cusbooneysiin doonaa natiijooyinkeena iyo cabirada hawsha, marka loo baahdo.

- Yoolka cabirka natiijada OFM HR – Xogta ayaa muujin doonta in OFM uu lahaan doono liiska shaqaalaha shaqo doonta isku dhafan oo intii hore ka badan oo ku jira NEOGOV ugu danbayn Diseembar 2024.
- Yoolka Cabirka Hawsha HR ka gobalka iyo OFM HR – Waxaan fikrado ka uruurin doonaa xubnaha bulshada kaasoo ku saabsan farsamooyinka qeexida hawsheena mustaqbalka iyo cabirada natiijada ugu danbayn Febraayo 2024.
- Yoolka Cabirka Hawsha HR ka gobalka iyo OFM HR – Waxaan diirada saari doonaa wacyi gelinta si aan u go'aamino qaybaha kamid ah hawsha shaqaale qorista ee aan hormar wayn ka samayn karno.
- Yoolka cabirka hawsha OFM HR – Waxaan dhaqan gelin doonaa fikradaha laga soo uruuriyo maamulayaasha shaqaaleysiinta si loo hormariyo khayraadka (tusaale, barta xiriirka, kiishada) ugu danbayn Diseembar 2023.

## Waa maxay ilaha xogta ee wakaaladaadu u adeegsan doonto cabirida guusha? Tixgeli ilaha xogta ee ay abuureen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseeya ee ay saamayntu gaartay marka la heli karo.

Waxaan u adeegsan doonaa fikradaha laga uruursho shaqaalaha ee aan ku qaban doono wada shaqaynta iyo xog uruurinnada dhammaadka. Waxaan sidoo kale uruurin doonaa fikrado ka imaanaaya shaqaalaha hadda ee gobalka iyo shaqaalaha imaan doona ee gobalka anagoo adeegsanayna kooxaha diirada iyo xog uruurinnada.

NEOGOV (Careers.wa.gov) ayaa uruurisa xogta deegaanka ee dhammaan codsadeyaasha iyo sida/goobta ay uga jiraan hawsha qiimaynta.

## Qeex qorshaha aad kula shaqaynayso, kula wadaagayso, ku dhagaysanayso, isbadel ku samaynayso, aadna wax uga baranayso bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu ku dhacayso inta lagu jiro dhaqan gelinta maalgashiga:

Waxaan ognahay in qaabka keliya ee aan ku qaban karno shaqada qorsheyaasha PEAR ee wakaaladaha aana si ku filan ugu adeegi karno dadka kaladuwan ee Washington ay tahay inaan haysano shaqaale isku dhafan oo dhaqanka ku haboon. Qorshaheena la shaqaynta iyo fahanka baahiyaha bulshooyinka saamayntu ku dhacayso ayaa ka kooban labo qaybood:

1. Inkastoo uusan ahayn wada shaqayn toos ah, waxaan qorsheynaynaa inaan akhrino aana fahanno fikradaha tooska ah ee bulshada ee wakaaladaha kale ee gobalku uruurshaan si aan u fahanno duleellada ka jira shaqaalaheena hadda. Tan ayaa naga caawinaysa inaan fahanno sida aan u nidaamin karno waaxaheena hadda ee shaqada (ama aan uga shaqeyn karno dhisida waaxo cusub, oo shaqada quseeya) si aan u taageerno shaqaalaheena aana u daboolno duleeladaan.

2. Sida aan kor uga doodnayba, waxaan aqoonsanaa in shaqaalaheena hadda iyo kuwa mustaqbalkuba ay waajahaan saamaynada sinaan la'aanta iyo natiijooyin maalin kasta, marka bulshada aan la shaqayno ayaa sidoo kale ah shaqaalaheena. Si aan u helno fikir toos ah oo aan ka helno shaqaalaheena, waxaan ka shaqeynaa inaan abuurno kanaallada fikirka oo aan la samayno kooxaha soo socda:

   a) **Kooxaha Khayraadka Ganacsiga –** Marka loo eego nooca shaqadooda, BRG yadeena ayaa uruuriya fikradaha shaqaaluhu ka qabaan khibrada iyo fursadaha ay ka helaan shaqada dawlada gobalka. Kooxahaan waa iskaashato muhiim u ah fikir uruurinta, waxaana qorsheynaynaa inaan dhisno qaabab toos ah iyo kuwo dadban oo aan ku helno fikirkaan xeeladaha mustabalka.

   b) **Codsadeyaasha shaqada –** Hadda ma hayno qaab aan ku fahanno meelaha codsaduhu ku dareemo sinaan daro. Haddii aan heli karno maal gelin dheeri ah oo aan ku bixino khayraadka shaqaale qorista, qayb muhiim u ah qorsheheena waa inaan si fiican u fahanno aana kor u qaadno khibrada codsadaha.

   c) **Golaha DEI ee Gobalka oo dhan –** Golahaan ayaa leh xubne ka socda ku dhawaad wakaalad kasta oo gobalka ah oo qabta shaqooyinka maalin kasta ee qorsheyaasha PEAR ee dhammaan wakaaladaha gobalka. Xubnaha golaha waxaa ku jira dad ka socda bulshooyinka taariikhiyan la liido oo la shqeeyaashu ka codsadaan inay la wadaagaan khibradahooda goobta shaqada si kalsooni leh. Waxaan qorsheynaynaa inaan abuurno qaabab rasmi ah oo aan ku uruurino fikradaha xubnaha gudiga DEI aana fikrado uga qaadno munaasabadaha Gudiga DEI (tusaale, Shirka DEI). Tan ayaa na siinaysa fahan dheeri ah oo ku aadan sinaan la'aanta hadda ka jirta khibrada shaqaalaha.

   d) **Iskaashatada shaqaalaha –** Hawsheena iskaashi wadareedka ayaa mar horeba u ogolaanaysa wakiillada midawga shaqaalaha inay codkooda nala wadaagaan iyo baahiyaha shaqaalaha ay matalaan. Iyo, waxaan sii wadi doonaa inaan dhagaysano aana xog ka uruurino iskaashatadeena shaqaalaha si aan ugala hadalno waxa shaqaalaha ay matalaan waajahayaan, anagoo haddana diirada saarayna dadka inta badan la faquuqo.

   e) **Hogaamiyaasha HR ka wakaalada –** Hogaanka HR keena ayaa sidoo kale u taagan inay taageeraan shaqaalaha wakaaladooda ayagoo ka shaqaynaaya dabooliska qorsheyaashooda PEAR. Sida aan sheegnayba, kahor inta aanaan ogaan duleellada ka jira nidaamka shaqaalaha hadda, waxaan u baahan nahay inaan fahanno waxa hogaamiyaasha HR ta wakaaladu u baahan yihiin si ay shaqadaan u qabtaan.

   f) **Xafiiska Sinaanta –** Waxaan kudarnaa codka Xafiiska Sinaanta, muhiimadaha HR ta Gobalka wakaalada ayaana ka qaybgasha kooxda shaqada Shaqaalaysiinta PEAR ka OFM.

Qeex qorshaha aad kula shaqaynayso, kula wadaagayso, ku dhagaysanayso, isbadel ku samaynayso, aadna wax uga baranayso bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu ku dhacayso inta lagu jiro dhaqan gelinta maalgashiga:

Fadlan arag jawaabta kore.

# Waaxaha Muhiimka ah ee Shaqada Wakaalada: Heshiisyada

## Muhiimada Laynka Adeegga ee PEAR ee baahiyaha ugu badan ka jiraan: **Isku dhafka Adeeg Bixiyaha**

### Muhiimada Laynka Adeegga ee PEAR ee baahiyaha ugu badan ka jiraan:

OFM wuxuu u baahan yahay Waxyaabaha soo socda:

- Tababarka iyo taageerada shaqaalaha maamulka heshiiska si loo baro sida loo raadiyo shaqaale isku dhafan.
- Xiriir joogto ah oo uu la sameeyo shaqaalaha barnaamijka.
- Helitaanka adeeg bixiyaasha xirfada leh ee buuxsha baahiyaha ganacsiga.
- Helitaanka adeeg bixiyaal shahaado qaadan kara iyo ku boorinta/siinta tilmaanta shahaado qaadashada.
- La samaynta iskaashi dheeri ah ururada bulshada.

### Qeexitaanka Maalgashiga Laynka Adeegga PEAR 3 - Soo koob xeerarka, hanaannada, farsamooyinka, iyo habraaca quseeya maalgashigaan:

OFM wuxuu abuuray Barnaamijka Isku dhafka Adeeg Bixiyaha oo raacaaya xeerarka lagu cadeeyay Amarka Fulinta 22-01, Xeerka Isku Dhafnaanta Adeeg Bixiyaha ee DES 090-06, Farsamooyinka Xafiiska Dadka laga Tirada Badan yahay iyo Haweenka Ganacsatada ah (Office of Minority and Women Business Entrepreneurs, OMWBE) ee Sinaanta Isticmaalka Lacagta, iyo hawlaha gudaha.

Dawlada ayaa ku amartay wakaaladaha gobalka cadadka lacagta ummada ee lagu bixinaayo ganacsiyada ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay, haweenka iyo dadka ciidanka ka baxay (eeg [Amarka Fulinta 22-01, Sinaanta Heshiiska Dawlada [PDF]](#) ). Si ay uga jawaabto, DES ayaa abuurtay Xeerka Isku Dhafnaanta Adeeg Bixiyaha 090-06, kaasoo uu ku jiro tababarka qasabka ah ee Isku Dhafnaanta Adeeg Bixiyaha ee dhammaan shaqaalaha waaxda iibka.

### Waa maxay sinaan la'aanta aad doonayso inaad u adeegsato maalgashiga si aad u yareyso ama u baabi'iso?

Hadda, tirada boqolkiiba ee qandaraasyada (iyo iibabka) leg ganacsiyada isku dhafan ayaa hooseeya. Yoolku waa in si siman loo helo fursadaha qandaraaska iyo iibka ee OFM, Xafiiska Baaritaannada Madaxa Banaan, Xafiiska Gudoomiyaha gobalka iyo shirkadaha sataleydka ee aan ku bixino adeegyada qandaraaska. Ayadoo la adeegsanaayo dedaallada barnaamijka isku dhafka adeeg bixiyaasha, waxaan fursado badan u heli karnaa inaan lacagta ku bixino ganacsiyada isku dhafan.

### Kooxahee dadka iyo/ama goobaha, ay baahida ugu wayn ka jirto, ayaa u baahan in diirada lagu saaro maal gelintaan?

Waxaan diirada saari doonaa bahda adeeg bixiyaasha, gaar ahaana dadka laga tirada badan yahay-, ganacsiyada ay leeyihiin haweenka iyo hawlgabka ciidanku.

### Wakaaladaadu ma la tashataa dawladaha qabiillada iyo Ururada Hindida Maraykanka ee la Aqoonsan yahay (RAIO)? Sidee ayuu maalgashigaan u dabaqayaa talooyinka ay baxsheen? Kuqor N/A haddii aysan ku qusayn.

Wakaaladaadu ma la tashataa dawladaha qabiillada iyo Ururada Hindida Maraykanka ee la Aqoonsan yahay (RAIO)? Hase yeeshee, waxaan wadnaa qorshe aan ku samaynayno dhawaan.

### Maxay bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu gaartay u aqoonsadeen inay tahay sababta ka danbaysa cadaalad darada? Sidee ayay maal gelintaadu u xalinaysaa dhibaatooyinkaan sababta keenay?

Sababta Ka Danbeeya: Sinaan la'aanta ka jirta helitaanka adeeg bixiyaha

- Helitaanka ciriiriga ah ee nidaamyada diiwaan gelinta, foomamka, tilmaamaha, iyo hawlaha.
- Cadadka yar ee agabka lagu heli karo qaabab badan iyo luuqado badan, marka loo baahdo.

Waxaan xalin doonaa arintaan anagoo:

- Kordhinta helitaanka adeeg bixiyaha: Diiwaan gelinta Bixiyaha Gobalka oo dhan ee OFM ayaa abuuri doonta cabirada fikir uruurinta ee shahaadada OMWBE si loo xaqiijiyo inaan nidaamyada cusub meesha ka saarin helitaanka adeeg bixiyaha. Xal u helida nidaamyada helitaanka, ee aan u baahnayn interneedka ama kumbuyuutarka keliya si loo diiwaan gasho.
- Kor u qaadista diiwaan gelinta adeeg bixiyaha: Waxaan ka qayb gelinaynaa bulshooyinka dhibaataysan iyo kuwa aan helin adeegyada ku filan inta aan dhisayno foomamka cusub, tilmaamaha, iyo hawlaha ka dhigaaya khibrada diiwaan gelinta mid fudud loona xaliyo caqabadaha si degdeg ah.

- Kordhinta lacagta wakaaladu adeegsato: Waxaan u adeegsan doonaa Barnaamijka Isku Dhafka Adeeg Bixiyaha OFM si aan u kordhino lacagta wakaaladu ku bixiso adeeg bixiyaasha ayadoo la adeegsanaayo isku xirka, waxbarashada, isbadellada hawsha, iyo yareynta/caqabadaha kale ee ka hor istaagaaya adeeg bixiyaasha isku dhafan inay ka qaybgalaan fursadaha qandaraas bixinta.
- Kor u qaadista jadwalka lacag bixinta; waxaan dejin doonaa nidaamyo lacagta adeeg bixiyaasha lagu baxsho si dhakhso ah marka ay qabtaan shaqada.

Sababta ka Danbaysa: Way adag tahay in la helo adeeg bixiyaal waayo maamuleyaasha qandaraaska ayaa u baahan inay ka baaraan saddex kayd xog.

Waxaan xalin doonaa arintaan anagoo:

- Ka codsanayna OMWBE iyo Waaxda Arimaha Halgameyaasha Washington inay nagu tababarto sida wax looga baaro kaydadkooda.
- In hogaanka barnaamijka Isku Dhafnaanta Adeeg Bixiyaha ee OFM inuu la kulmo dhammaan maamuleyaasha qandaraaska waaxaha si loo go'aansho sida aan qaabka ugu haboon u caawin karno maamuleyaasha qandaraaska.
- Xaqiijinta in hogaanka barnaamijkeenu uu diyaar u yahay inuu caawiyo dhammaan shaqaalaha.

Xiriir joogto ah oo uu la sameeyo shaqaalaha barnaamijka.

Waxaan xalin doonaa arintaan anagoo:

- Adeegsanayna qorshaha cusub ee isgaarsiinta ee Waaxda Istaraatiijiyada Ururka OFM iyo Hogaanka Waxqabadka si looga caawiyo barnaamijka Isku dhafnaanta Adeeg bixiyaha ay u gudbiyaan barnaamijka Isku dhafnaanta Adeeg bixiyaha Shaqalaha.

Sababta Keenaysa: Waa inaan helnaa adeeg bixiyaasha xirfada leh ee buuxin kara baahiyaha ganacsiga.

Waxaan xalin doonaa arintaan anagoo:

- Ku xirayna adeeg bixiyaasha bandhigyada kulannada ururka adeeg bixiyaasha, kulannada fool ka foolka ah ee lala yeesho adeeg bixiyaasha, iyo la kulmida iyo salaamaha u dhexeeya adeeg bixiyaasha iyo shaqaalaha.

### Sidee ayay maal gelintaadu u xalinaysaa walaacyada iyo muhiimadaha ay tilmaameen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseeya ee ay saamayntu ku dhacayso?

OFM, Xafiiska Gudoomiyaha iyo saraakiishiisa, iyo OII ayaa gelinaaya cadad loo siman yahay ganacsiyada kaladuwan. Maalgelinta ayaa xalinaysa ayadoo diirada saaraysa qaababka aan u kordhin karno lacag bixinteena kaladuwan: Isku xirka adeeg bixiyaha, tababarka shaqaalaha iyo caawimaada baaritaanka, iyo yareynta caqabadaha.

### Sidee ayay maal gelintu u kordhin kartaa ama u yareyn kartaa gunnooyinka bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseynaaya? Kordhinaysa ama yareynaysa culaysyada? Sidee ayay wakaaladaadu ku aqoonsanaysaa ayna ku yareynaysaa waxyeelooyin kasta oo aan loo qasdin?

OFM, Xafiiska Gudoomiyaha iyo saraakiishiisa, iyo OII ayaa gelinaaya cadad loo siman yahay ganacsiyada kaladuwan. Maalgelinta ayaa xalinaysa ayadoo diirada saaraysa qaababka aan u kordhin karno lacag bixinteena kaladuwan: Isku xirka adeeg bixiyaha, tababarka shaqaalaha iyo caawimaada baaritaanka, iyo yareynta caqabadaha.

Haddii dakhliga ku baxaaya qandaraaska uu kordho, markaas tiro badan oo kamid ah dadka laga tirada badan yahay; ganacsiyada ay leeyihiin haweenka iyo dadka ciidanka soo maray ayaa heli doona dakhliyada badeecooyinka iyo adeegyada. Marka ganacsiyadu koraan, waxay kordhin karaan tirada dadka ay shaqaalaysiiyaan. Kordhinta shaqada ayaa lacag badan gelinaysa bulshooyinka isku dhafan waxayna ka caawisaa kobaca dhaqaalaha.

### Go'aamiyaasha PEAR ee Sinaanta ee lagu taageeraayo maalgelintaan.

Go'aamiyaasha PEAR ee Kooxaha Sinaanta [Nidaamyada Taageerada Bulshada (Waaxda), Nidaamyada Taageerada Qoyska (Laamaha), Kaabeyaasha Bulshada (Nidaamka Aasaasiga ah), Shaqooyinka Dawlada (Ciida iyo Macdanta)] ee lagu taageeraayo maalgelintaan.

### Natiijooyinka PEAR ee la Doonaayo:

Kordhinta isku dhafnaanta adeeg bixiyaha iyo adeegga OFM, OII iyo Xafiiska Gudoomiyaha Gobalka.

### Habdhaqannada PEAR ee loo baahan yahay si loo gaaro Natijooyinka PEAR ee loo la doonaayo:

Sinaanta, helitaanka, sharafta, iyo kamid ahaanshaha.

### Hogaanka ama Kooxda Maalgashiga Laynka Adeegga PEAR - Yaa masuul ka ah hogaaminta talaabooyinka?

Kooxaha Qandaraasyada, iyo Adeegyada Sharciga iyo Qandaraastada, iyo Xisaabaadka Gobalka oo Dhan.

### Baahiyaha wada shaqeynta - Yay u baahan tahay wakaaladu inay la shaqayso si ay maal gelin u samayso?

Shaqaalaha qandaraasyada ayaa la shaqayn doona DES, OMWBE, WDVA iyo ururada adeeg bixiyaasha.

### Waa maxay caqabadaha, culaysyada, iyo/ama khataraha ka imaan kara maalgashigaan?

Caqabadaha na haysta waxaa kamid ah in aanaan awoodin in aan doorano adeeg bixiye markasta oo aan iib samaynayno, maamuleyaasha qandaraaska oo aan aqoon sida loo raadiyo adeeg bixiyaasha, iyo inaanaan haysan dookhyo nagu filan oo ka jira ganacsiyada qaar si loo daboolo baahiyaha ganacsiga. Ma haysano nidaamyada baaritaanka oo nagu filan waxaana jira baahi loo qabo nidaamka xogta ee cilmi baarista.

### Xalalka la aqoonsaday si loo xaliyo baahiyaha khayraadka iyo caqabadaha/culaysyada/ khataraha:

Waxaan leenahay ciwaanka iimeelka ee gaarka u ah diiradaan: ofmbuysdiverse@ofm.wa.gov. Waxaan sidoo kale abuurnaa bogga fariimaha ee shaqaalaha iyo bogga interneedka si loogu xiro bulshooyinka saamaynada. Waxaan la xiriirnaa ururada yaqaana ee caawiya bulshooyinka iyo adeeg bixiyaasha saamayntu gaartay. Ururada doonaaya inay la shaqeeyaan mashruucaan waxaa kamid ah AWMB, Tabor 100, Washington Procurement Technical Assistance Center (Xarunta Caawinta Farsamada Shaqaalaysiinta ee Washington) (PTAC) North Minority Builders Alliance (Xulafada Dhisayaasha Yar ee Northwest) (NWMBA) iyo Black Collective (Iskudarka Madawga).

### Taariikhda Biloowga Maal gelinta Laynka Adeegga PEAR

Oktoobar 2022 (wajiga naqshada) iyo Luuliyo 2023 (wajiga dhismaha)

### Taariikhda Biloowga Maal Gashiga Laynka Adeegga PEAR:

Janaayo 2025

Cabirada Waxqabadka PEAR - Waa maxay cabirada loo adeegsan doono go'aaminta waxtarka maalgashiyada? Cabiradaan fikir ma ku darsadeen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu gaartay? Dooro ugu yaraan 1 cabirka natiijada loo adeegsado qiimaynta iyo waxtarka maalgashiga ka guul gaarista Natiijada habaysan ee PEAR. Dooro cabirka hawsha 1 ee loo adeegsado si loo qiimeeyo in shaqooyinka maal gelinta la dhamaystiro.

Cabirka natiijada Lambar 1: Kordhinta maal gelinta dadka laga tiro badan yahay iyo ganacsiyada ay leeyihiin dumarku ilaa 6.4%. Waxaan sidoo kale doonaynaa inaan kordhino lacagta aan ku bixino ganacsiyada ay leeyihiin dadka ciidanka soo maray heer dhan 1% kahor Diseembar 30, 2026.

Cabirka hanaanka Lambar 1: Warbixinnada qarashka ee rubuc sanadka. Warbixinadaan ayaa loo adeegsan doonaa Cabirka Waxqabadka PEAR si loo go'aansho waxtarka maalgashiyada.

Yoolalka PEAR - waa maxay waxa rasmiga ah ee wakaaladaadu ka guul gaarayso 3 bilood ee ugu horaysa (Rubuca 1) kadib taariikhda biloowga maalgelintaan? Yoolalkaan fikir ma ku darsadeen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiisaynaaya ee saamayntu gaartay? Dooro 1 yool calaa natiijo kasta iyo cabirka hawsha.

Yoolka cabirka natiijadeena Lambar 1:

- Ka qaybgal Kulanka Qandaraas Bixinta ee Gobalka ee Washington Sibteembar 20, 2023.
- Ku dhiiri geli 50 qandaraasle si ay uga qaybgalaan tababarka OMWBE.
- La hadal/u gudbinta ugu yaraan sadex ururada adeeg bixiyaha ah.
- La samaynta 10 kulan iyo salaan adeeg bixiyaasha.

Yoolka hawsheena cabirka Lambar 1: Buuxi munaasabadaha mudeysan.

Cabirka Hawsha ee Lambar 2: Waa maxay ilaha xogta ee wakaaladaadu u adeegsan doonto cabirida guusha?

Waxaan tixgelin doonaa ilaha xogta ee ay abuureen bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee xiiseeya ee ay saamayntu gaartay marka la heli karo. Waxaan sidoo kale kasoo ceshan doonaa xogta warbixinta OFM, waxaana cabiri doonaa warbixinnada sanadlaha ah ee oo aan u babac dhigayno yoolalka u degsan OMWBE iyo WDVA.

Cabirka Hawsha Lambar 3: Qeex qorshaha aad kula shaqaynayso, kula wadaagayso, ku dhagaysanayso, isbadel ku samaynayso, aadna wax uga baranayso bulshooyinka/shaqaalaha/dhinacyada kale ee saamayntu ku dhacayso inta lagu jiro dhaqan gelinta maalgashiga:

- Uruurinta fikradaha macaamiisha, abuurista kooxaha diirada, qiimaynta xogta, ku xirida ganacsiyada Kooxaha Khayraadka Ganacsiga, la kulmida maamuleyaasha qandaraaska ee waaxaha, ku xirmida ururada adeeg bixiyaasha, iyo wada hadal lala sameeyo adeeg bixiyaasha.